**Xarunta Iskudubbarridka Macluumaadka Badda ee Puntland**

JMICC

**Joint Maritime Information and Coordination Centre of Puntland (JMICC)**

## FAHANKA GUUD EE JMICC

JMICC (Joint Maritime Information Coordination Centre) waa hay'ad dowli ah oo loo aasaasay si kor loogu qaado ka faa'iidaysiga khayraadka Badda, wadaagga maclumaadka iyo ka hortagga danbiyada ka dhaca Badaha Puntland.

Puntland waxay leedahay xeeb dherar keeda lagu qiyaasay 1600km waxayna kutaal Geeska Africa waxana sidoo kale isugu yimaada badaha Gacanak Cadmeed iyo Galbeedka Badweynta Hindiya, waa meel istiraaji u ah isku socodka ganacsiga aduunka hadii uu khalkhal galo amniga badda Puntland waxa uu dhaawacaysaa dhamaan degaanka Somaalida degto, Gobalka iyo Caalamkaba, waxaana tusaale inooku filan sannadihii ay ka dilaaceen Burcad-badeeda waxyaalihii ay sameeyeen sidaa daraadeed iyadoo dawladda Puntland ilaalinayso amninga guud ee baddeeda iyo kawar qabkeeda waxay asaastay hay'adda JMICC sidii ay si dhow ula socon lahayd waxa kadhacaya xeebaha Puntland iyo dhamaan xuduud badeed deeda xog saxana uga helilahayd.

## Waa maxay waxa asaasiga u ah JMICC?

Waa helidda macluumaadka Badda sida denbiyada kadhaca iyo talo siinta hay'adaha dawladda markii ay xaalad soo cusboonaato. JMICC waxaa si joogta ah la filayaa inay xogta uga hesho xarumaha xeebaha ku yaal ee Puntland, Hay'adaha kashaqeeya xogaha badda ee Gobalka gaar ahaan kuwa xoogga saara Galbeedka Badweynta Hindiya, Gacanka Cadmeed, Badda Carabta iyo waliba caalamka, sidoo kale iyadoo adeeegsanaysa shaqaale xirfad leh iyo qalab casriya ayey si dhow ula soconaysaa waxyaalaha Gobalka ka dhacaya.

## Waa maxay waxa ugu weyn ee ay JMICC soo saarayso?

Waan inay bixiso xogo wakhtiyeysan, hufan oo sax ah, iyo talo bixin markii ay timaado xaaladaha ka dhaca badda sida denbiyda badda, shilalka kadhaca badda, xaaladaha degdegga ah ee kadhaca badda iyo dhamaan xeebaha Puntland.

**Waa maxay doorka JMICC ay ku leedahay Dawladda?**

JMICC waxay dawladda Puntland ka caawinaysaa go'aan gaarista marka ay dhacaan shilalka badda, xaaladaha degdega ah ama masiibooyinka iyadoo siinaysa wasaaradaha iyo sidoo kale hay'adaha dawliga ah xog ku saabsan sidii looga falcelin lahaa xaaladda markaas taagan. Tusaale ahaan hadii ay Puntland ka dhacaan Duufaan, Daadadka waxyeelo u gaysan kara nolasha dadk, maraakiibta jiriifka ay soo galaan xeebaha Puntland, burcadbadeeda iyo wixii lamida, JMICC waxay xoogga saaraysaa sidii ay xog saxa uga heli lahayd meesha ay waxaas ka dhacayaan iyo sida ugu haboon ee loo wajihi karo si ay dawladda uga taageerto go'aannada ay ka qaadanayso arrimahaas.

**Maxaa laga rajaynaya JMICC mustaqbalka?**

JMICC waxay tijaabo u tahay in Puntland yeelato mustaqbalka Xarunta dhexe ee Xaaladaha. Laga bilaabo 2020 iyo wixii kadanbeeya JMICC waxay xoogga saaridoontaa sidii loo abauuri lahaa taageero iyo iskaashi ay la yeelato Wasaaradaha muhiimka u ah iyo hay'adaha kale ee dawliga ah sida Wasaaradda Gaadiidka Badda, Dekadaha iyo ka Hortaga Denbiyada Badda, Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Khayraadka Badda; Wasaaradda Amniga iyo Hub kadhigista, Wasaaradda Cadaaladda, Dinnta iyo Dhaqancelinta. Wasaaradda Deegaanka iyo Isbadlka Cimiladda, Wasaaradda Arimaha Gudaha, Federalka iyo Dimuqraadiyada, Wasaaradda Warfaafinta iwm. waxaa iyagana wadashayn ka dhaxaynaysaa Hay'adaha Dawliga ah sida hay'adda HADMA.

JMICC waxay diyaarisay qeyb kamida xarumihii xeebaha xogta kasoo diri lahaa sida Bosaaso oo hada si toosa xogta looga helo sidoo kale EYL ayaa ladhamaystiray, waxaa iyana qalabkeedii yaalaa Garacad oo lafilayo inta sanadkaan ka dhiman in larakibo sitoosana ushaqa gasho, sidoo kale waxay qorshaynaysan in sanadka soo socda in xarumaha kale ee haray ay dhamaystirmaan.

waxaa iyana xusid mudan in meelaha xurumaha xeebaha laga samaynayo ay sida u kala muhiimsan yihiin ay dawladdu soo gudbiso.

JMICC waxay u socotaa inay noqoto meel la aqoonsanyahay oo bixisa warbixin saxa oo wakhtiyeysan oo lagu taageero go’aannada ay qaadanayso dawladdu marka lagu jiro xaaladaha degdega ah iyo shilalka gaar ahaan qeybta badda iyo xeebaha.

**Sida ay JMICC uga Qaybqaadanayso Horumarka Dalka**

Xiriir ayaa ka dhaxeeya amniga iyo horumarka: Amni la’aanta iyo amni xumaduba waxay sababaan in aysan imaan maalgashi caalami ah (Foreign Direct Investment) sidoo kale inaan deegaanka laga fulin karin mashaariicda horumarineed ay deeq bixiyaashu bixiyaan, waxayna sababtaa in dhaqaalaha wadanku hoos u dhoco, bulshaduna ay soo foodsaarto shaqa la’aan baahsan iyo nolal xumo. Dhanka kale nabadgelyada wanaagsani waxay fududaysaa in dadka iyo deegaan kuba gaaro horumar dawladuna ay gacan buuxda ku hayso deegaanka oo dhan.

Puntland waxay leedahay xeeb dheer oo khayraad badan leh, horumarna lagu gaari karo khayraadka badda kujira “Blue Economy”: Kaluumaysiga, shidaalka cayriin, Dalxiiska, isku socodka Doomaha iyo Maraakiibka safarada gaaban, Dekadaha ay ku xirtaan shixnadaha badda maraya si ay sahay uga qaataan sahay iyo wixii lamida. JMICC iyadoo shaqadeega macluumadka wada ayey si toos ah gacan uga geysan doontaa hagaajinta amniga guud ee dalka waxayna sidoo kale asaasaysaa nidaam maamul oo badda ah (Maritime Government) iyo in la sameeyo ama lagaaro jawi lagu soo jiidan karo caalamka.